

BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

Tallaalka Pneumococcal Polysaccharide (PPSV23): Waxa aad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Many vaccine information statements are available in Somali and other languages. See www.immunize.org/vis

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa Af-Soomaaliga iyo luqado kaleba. Booqo www.immunize.org/vis

1. Maxaa la isu tallaalayaa?

Tallaalka pneumococcal polysaccharide (PPSV23) wuxuu ka hortagi karaa cudurka pneumococcal.

Cudurka pneumococcal waxaa laga wadaa wixii cudur ah oo ay sababto baktiiriyada pneumococcal. Bakteeriyadani waxay sababi kartaa noocyo badan oo cudurro ah, oo ay ka mid yihiin:

- Oof-wareen (cudurka sambabada)
- Infakshanada dhagaha
- Infakshanada sanko
- Meninjaaytis (infakshanka ku dhaca xuubka maskaxda daboolo iyo xangulada lafdhabarta)
- Bacteremia (infakshanka dhiigga)

Qof walba wuu qaadi karaa cudurka pneumococcal, laakiin carruurta yaryar, dadka waaweyn, iyo dadka leh arrimo khatar ah ayaa halista ugu badan ku jira.

Infakshanada oofwareenka badankood waa kuwo fudud. Hasa ahaatee, qaar ayaa ka imaan kara dhibaatooyin muddo-dheer ah, sida waxyeelo gaara maskaxda ama luminta maqalka. Qoorgooyaha, bakteeriyada dhiigga, iyo oofwareenka uu sababo cudurka oofwareenka ayaa noqon kara mid khatar dhimasho leh.

2. PPSV23

PPSV23 wuxuu kaa ilaalin 23 nooc ee ah baktiiriyada sababta cudurka pneumococcal.

PPSV23 waxa lagula talinayaa sida ikhtiyaarka ah carruurta iyo dhalinyarada qaarkood ee qaba xaalado caafimaad qaarkood ama arrimo halis ah.

Dadka waaweyn, PPSV23 waxaa lagula talinayaa iyadoo la raacayo qiyaasta tallaalka pneumococcal conjugate 15-valent (PCV15).

Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah.

3. La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka

U sheeg bixiyahaaga tallaalka haddii qofka la siinayo tallaalka:

- Uu horey u qabay **dareen-celin xasaasiyadeed kadib marka qiyaas hore ee PPSV23 uu qaatay**, ama uu lahaa wax **xasaasiyado daran, nolosha-halis galin kara**.

Xaaladdaha qaarkood, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inuu dib ugu dhigo tallaalka PPSV23 booqosho mustaqbalka ah.

Dadka qaba jirrooyinka sahlan, sida hargabka, waxaa laga yaabaa in la tallaalo. Dadka dhexdhexaad ahaan u xanuunsan ama aad u xanuunsan waa in ay caadi ahaan sugaan illaa ay ka soo kabsanayaan/boksoonayaan inta aan la siin PPSV23.

Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah.



U.S. CENTERS FOR DISEASE CONTROL AND PREVENTION

4. Halista dareen-celinta tallaalka

- guduudasho, barar, xanuun, ama jilicsanaan meesha tallaalka laga qaatay; daal; madax xanuun; qandho; qarqaryo; ama murqo xanuun ayaa dhici kara PPSV23 kadib.

Dadka ayaa mararka qaarkood miyir beela kadib marka hawlgaal-caafimaad lagu sameeyo, oo ay tallaalkuna ka mid tahay. U sheeg bixiyahaaga haddii aad dareento dawakhaad ama isbadal ku yimaada aragaaga ama dhaguhu ku guuxaan.

Sida dawo walba ee kale, waxaa jira fursad suurtagalkeedu aad u yar yahay in uu tallaalka sababo dareen-celin xasaasiyad ah ee daran, dhaawacyo kale ee halis ah, ama dhimasho.

5. Maxaa dhacaya haddii ay jirto dhibaato halis ah?

Dareen-celin xasaasiyadeed ayaa dhici karta kadib marka qofka la tallaalay ka tago rugta caafimaadka. Haddii aad aragto calaamadaha falcelinta xasaasiyadeed oo daran (furuuruc, wajiga oo barara iyo cuno/dhuun barar, neefsashada oo adkaata, wadnaha oo degdeg u garaacma, wareer, iyo tabbar darri), fadlan wac lambarka **9-1-1** kadibna qofka gaarsii isbitaalka kuugu dhow.

Wixii calaamado kale ah ee welwel kuu keena, wac bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

Dareen-celinta halista ah waa in loo sheegaa nidaamka qaabbilsan dareen-celinta halista ah ee lagu magacaaabo Vaccine Adverse Event Reporting System (Nidaamka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka) (VAERS). Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa badanaa gudbin doona warbixintan, ama adiga laftaada ayaa sidaa sameyn kara. Ka booqo websaytka VAERS barta www.vaers.hhs.gov ama wac **1-800-822-7967**. *VAERS waxaa loogu talagalay oo kaliya u soo sheegida falcelinada, isla mar ahaantaana xubnaha shaqaalaha ee VAERS awood uma lahan inay bixiyaan talo caafimaad.*

Somali translation provided by Immunize.org

6. Sideen wax badan u ogaan karaa?

- Weydii bixiyaha qaabbilsan daryeelkaaga caafimaadka.
- Wac waaxda qaabbilsan caafimaadka ee deegaankaaga ama gobolkaaga.
- Booqo mareegta Food and Drug Administration (Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka) (FDA) si aad u hesho xaashiyaha sanduuqa tallaalka iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan, kana eeg www.fda.gov/vaccines-blood-biologics/vaccines.
- La xiriir Centers for Disease Control and Prevention (Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada) (CDC):
 - Wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
 - Ka booqo mareegta CDC barta www.cdc.gov/vaccines.

